Oregon Department of Human Services
INTELLECTUAL/DEVELOPMENTAL DISABILITIES

Farriintan waxaa lagu soo gudbiyey luuqadaha Ingiriis, Ruush, Shiinays, Soomaali, Isbaanish iyoViitnaam iyadoo laga heli karo barta: https://www.oregon.gov/dhs/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

5ta Janaayo, 2022

Ku socoto: Shaqaalaha iyo Bahwadaagta Xafiiska Adeegyada Hormarinta Naafada ama ODDS (**CMEs iyo Bixiyayaasha adeegga**, fadlan xogtan u gudbi dadka qaata adeegyada I/DD iyo qoysaskooda. Mahadsanid.)
Ka socoto: Lilia Teninty, Maamulaha Xafiiska Adeegyada Hormarinta Naafada
Mowduuca: In sannadka 2022 nidaamkeena laga dhigo mid uu shakhsigu xuddun u yahay

Sannad Cusub! Waxaan ku faraxsanahay inaan ku dhawaaqo in sannadkan gudihiisa nidaamkeena Xafiiska Adeegyada Hormarinta Naafada ama ODDS lagu soo kordhin doono hormar dheeraad ah taasoo shaqada ka dhigeysa mid uu shakhsigu xuddun u yahay.

Mashruuca Jiheeyaha Doorashadaada. Qaabkaaga. Mustaqbalkaaaga.

Mashruuca Jiheeyaha waxa uu dib u dhacay muddo ka badan laba sanadood taasoo uu keenay cudurka safmarku iyadoo Xafiiska Adeegyada Hormarinta Naafada ama ODDS iyo bahwadaagteenuna ay diiradda saareen badbaadada dadka ku xiran I/DD. Waxaan halkeeda kasii wadi doonaa hawshaas iyadoo Mashruuca Jiheeyuhuna nidaamkeena uusii kobcin doono si uu u noqdo mid uu shakhsigu xuddun u yahay. Tan macneheedu waa inaan diiradda dib usii saari doono nidaamka ODDS gaar ahaan baahiyaha shakhsiga ee la xiriira sidii uu u heli lahaa nolol buuxda oo ku saleysan baahiyahooda gaarka ah, danahooda iyo doorashadooda.

Laga bilaabo hadda, waad ka warqabtaa qiimeynta Baahiyaha Oregon (ONA). Sannadkan waxaan idiin soo gudbin doonaa kooxaha adeegyada

iyo qiimaha cusub. Sannadka soo socda, waxaan dib u bilaabi doonaa Qorshaha Taageerada Shakhsi ahaaneed ee la hormariyey (ISP) taasoo suurtagelinysa in dadka idinka midka ah ee qaata adeegyada iyo baahiyihiinuba ay xuddun u noqdaan habraaca. Sidoo kale hawshani waxay suurtagelin doontaa in habraacyada Xafiiska Adeegyada Hormarinta Naafada ama ODDS ay noqdaan kuwo qeexan oo si dhibyar loo fahmi karo.

Qalabyada fiidyowga

Halkan waxaad ka heli kartaa laba fiidyow oo aad ka heli doonto xog dheeraad ah oo ku saabsan hawsha Mashruuca Jiheeyaha iyo qaabka ay isugu aaddan yihiin dhamaan qeybaha kala geddisan.

- "Isbadalada Mustaqbalka" — Waa fiidyow aad ka daawann doontaan waxyaabaha soo socda.
- "Xog ku saabsan fiidyowga" — Nick Kaasa wuxuu falanqeyn doonaa aalad cusub, taasoo ah aaladda xidigta isku jaan-go'an oo lagu magacaabo the Integrated Support Star of the LifeCourse Framework, taasoo shakhsiyaadka iyo kooxahooda ka caawin doonta inay sameystaan Qorshahooda Taageerada Shakshi ahaaneed ama ISP.

Tababaradda soo socda

Si lagaaga caawiyo inaad ku talaabsatid hormaradii ugu danbeeyey ee mashruucan waxaan ku siin doonaa dhowr tababar inta lagu jiro dhowrka bilood ee soo socda. Tababarka lagu magacaabo"Compass 100" kaasoo loogu talo-galey CMEs iyo Bixiyayaasha adeegga wuxuu bilaabmayaa 25ka iyo 27ka iyo 8da febraayo kaasoo loogu talo-galey qolyihiina qaata adeegyada I/DD iyo qoysaskiina.

Si aad isaga diiwaan-gelisid tababarka online-ka ama tooska ah dhamaan wixii xog ah ee aad u baahan tahay waxaad la heli kartaa Xarunteena Tababarka ee Mashruuca Jiheeyaha. Halkaas waxaad ka heli doontaa qeexitaan ku saabsan tababar kasta, ciwaan la iska diwaan-gelinayo ama lala xiriiro iyo ciwaano laga heli karo muuqaalada fiidyowga ee tababarada la qaatay.

Todobaadka ugu horreeya ee bil kasta oo ka mid ah sannadka 2022, CMEs iyo Bixiyayaasha adeeggu waxay heli doonaan soogudbin ku

saabsan tababarada la qaban doono lixda todobaad ee soo socota iyo agabyada kaa caawin kara ka-jawaabitaanka su'aalaha. CMEs iyo Bixiyayaasha adeegga, waxaa la idinka rabaa inaad xogtan u gudbisaan shaqaalihiina, shakhsiyaadka qaata adeegyada Xafiiska Adeegyada Hormarinta Naafada ama ODDS iyo qoysaskooda.

Waad ku mahadsan tahay inaad nagala shaqeysid kobcinta nidaamka I/DD ee Oregon iyo inaan adeegga ka dhigno mid uu shakhsigu xuddun u yahay, Kooxda Xafiiska Adeegyada Hormarinta Naafada ama ODDS waxay dadaal dheeraad ah ku bixiyeen isla mar ahaantaana farxad u ah inay adiga kula fuliyaan talaabooyinka soo socda.

Mahadsanidiin,

Lilia Teninty
Maamulaha
Xafiiska Adeegyada Hormarinta Naafada

Farriimihii hore ee Maamulaha Xafiiska Adeegyada Hormarinta Naafada ama ODDS waxaa laga heli karaa ciwaankan
http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx

Nagala soco barta ciwaanka Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS isla mar ahaantaana wax badan ka ogow barteena.

Nuqulka dhukmintigan waxaad ku heli kartaa luuqado kale, daabacadda ballaaran, luuqadda indhoolaha ama qaabka aad adigu jeceshahay. La xiriir Xafiiska the Oregon ee Adeegyada Hormarinta Naafada adigoo adeegsanaya lanbarka 503-945-5811. Waanu qabanaa dhamaan wicitaanada naga soo gaaraya dadka dhagoolayaasha, dhagoolayaasha-indhoolayaasha ah, kuwa uu hadalku dhibayo ama kuwa ay haysato naafonimo dhinaca hadlitaanka. Wixii xog dheeraad ah ee ku saabsan xarumaha soogudbinta ee adeeg-bixiyayaasha fadlan booqo ciwaanka www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.